



**Ra'yi-baarista ardayga ee Ayaga Iigu Sheega:
Macluumaadka iyo foomka ogolaanshaha ee waalidiinta iyo daryeelayaasha
Xarunta Tirakoobka Waxbarashada iyo Qiimeynta**

Waalidiinta iyo Daryeelayaasha Sharafta leh,

Teeramkan, dugsiigaaga ayaa ka qaybgalaya ra'yi-baarista ardayga ee *Ayaga Iigu Sheega* (*Tell Them From Me*). Cilmi-baaristu waxay na siisaa war-celin qiimo leh oo ku saabsan waxay ardaydeenu ka qabaan nolosha dugsiiga, sida looga qaygeliyo dugsiiga iyo siyaabaha kala duwan ee bareyaasha iyaga ula dhaqmayaan. Dugsiyada Australia iyo kuwa adduunka kale waxay u adeegsadaan ra'yi-baarista *Tell Them From Me* si ay uga caawiso inay wax horumariyaan. Ra'yi-baarista waxaa lagu dhammeystiraa on-line oo waxaa maamula shirkad cilmi-baaris madaxbannaan, **The Learning Bar**, taas oo ku takhasustay ra'yi-baarisayada dugsiiga-ku-salaysan.

Shaqaalaha dugsiyadu **ma** awoodi doonaan inay ka aqoonsadaan shakhsiyadda ardayda jawaabahooda. Si loo hubiyo qarsoodinimada, ardayda ka-qeybqaadata waxay heli doonaan magac gaar ah iyo baasweedh. Halka haddii in ka yar shan arday ay ka soo jawaabaan su'aasha, natiijooyinka waa la xakameynayaa. Ra'yi-baarista waxay caadi ahaan qaadanaysaa 30 daqiiqo ama ka yar si loo dhammaystirona waxaa maamuli doona dugsiiga inta lagu jiro saacadaha dugsiiga oo caadiga ah. Isla markii ra'yi-baarisayada ay dhammeeyaan ardaydu, warbixinno ayaa laga diyaariyaa badiba xaaladaha waxayna heli karaan dugsiyadu saddex maalmood shaqo gudahooda.

Sidoo kale ayadoo dugsiyadu helayaan war-celinta ardayda, ayaa Wasaaradda Waxbarashada, iyadoo u maraysa Xarunta Tirakoobka Waxbarashada iyo Qiimeynta (Centre for Education Statistics and Evaluation (CESE)), waxay heli kartaa xogta laga helo NSW oo dhan waxayna maamushaa mashruuc cilmi baaris ah oo lagu eegayo qaababka dowlad-goboleedka oo dhan ah ee fayoobidda ardayda, ka-qaybgelintooda iyo waxqabadyada baridda ee waxtarka leh. Cilmi-baaristu waxay eegaysaa siday waxyaabahani u saameeyaan natiijooyinka ardayda, oo ay ka mid tahay waxqabadka aqooneed. Ardayda gaarka ah **laguma** aqoonsan doono daabacaadaha kasta ee CESE, dhammaana macluumaadka waxaa loo hayn doonaa si waafaqsan sharciyada gaarnimada ee khuseeya. Macluumaadka shakhsiyadeed ee ardayda Wasaarada uma ay sheegi doonto qof kale ama cid kale oo aan ka ahayn inta uu sharcigu farayo.

Cilmi-baaristan waxay ka caawineysaa dugsiyada New South Wales inay si fiican u fahmaan sida loo horumariyo fayoobida iyo ka-qaybgelinta ardayda. Waxay kaloo ka cawinaysaa bareyaasha iyo maamuleyaasha inay ka wada-hadlaan wixii howlo ah oo lagu horumarin karo natiijooyinka ardayda.

Ka qaybgalka ra'yi-baarista waa mid ikhtiyaari ah. Ilmahaagu kama qaybgeli doono haddii adiga ama ilmahaagu aanu rabin. Haddii, inta lagu jiro ra'yi-baarista, ilmahaagu uusan jeclayn, isagu/iyadu waxay dooran karaan inay joojiyaan ra'yi-baarista wakhti kasta. Su'aalaha ra'yi-baarista badankood ayaa laga gudbi karaa.

Haddii **aadan rabin ilmahaagu inuu ka qaybqalo** ra'yi-baarista, fadlan buuxi foomka halkan ku lifaaqan una sooceli dugsiiga ilmahaaga

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ra'yi-baarista iyo cilmi baarista waxaa laga heli karaa ayadoo Ingiriis ah oo ku taal website-ka CESE: <http://surveys.cese.nsw.gov.au/information-for-parents>

Maamulaha

Dr Jenny Donovan
Agaasimaha Fulinta
Centre for Education Statistics and Evaluation

Tell Them From Me Student Feedback Survey non-consent form

Foomka ogolaansho la'aanta Ra'yi-baarista War-celinta Ardayga ee Ayaga Igu Sheega

Fadlan Ingiriisi ku-buuxi

Haddii **aadan rabin** in ilmahaaga uu ka qaybgalo ra'yi-baarista war-celinta ardayga, fadlan saxiix foomkan kuna soo celi dugsigaaga

I DO NOT give consent for my child/children to participate in the **Tell Them From Me student feedback survey**.

MA DOONAYO inaan ogolaansho ilmahayga/carruurtayda inay ka-qaybgaloaan **Ayaga Igu Sheega Ra'yi-baarista War-celinta Ardayga**.

Magaca ardayga 1aad
Name of student 1

Fasalka ardayga 1aad
Roll class of student 1

Magaca ardayga 2aad
Name of student 2

Fasalka ardayga 2aad
Roll class of student 2

Magaca ardayga 3aad
Name of student 3

Fasalka ardayga 3aad
Roll class of student 3

Magaca ardayga 4aad
Name of student 4

Fasalka ardayga 4aad
Roll class of student 4

Name of parent/carer
Magaca waalidka/daryeelaha (fadlan qor)

Signature of parent/carer
Saxiixa waalidka/daryeelaha

Date
Taariikhda